



Baaritaanka hantida iyo deynta laga dhintay iyo wargelinta dhaxalka (dödsboanmälan)

Maxay tahay? Goormeese la sameeyaa?

Baaritaanka hantida iyo deynta laga dhintay

Marka qof geeriyoodo dadkiina dhaxalka ku leh waxaad sameyneysaan diiwaangelinta hantida iyo deynta uu ka tegay qofka dhintay (en bouppteckning). Taasna micnaheedu waxay tahay in aad xisaabisaan oo qoraal ka sameysaan qofka dhintay iyo xaaska/ninka hantidooda iyo deyntooda.

Waxa aad sameyneysaan waxaa lagu magacaabaa diiwangelinta hantida iyo deynta qofka dhintay (bouppteckning) muddo saddex bilood ah gudahood marka qofku geeriyoodo kadib. Warqadaas waxaad u direysaan waaxda canshuuraha (Skatteverket) markaad diyaarisaan bil gudaheed.

Foomka lagu qoraaya iyo warqadaha warbixintu ku yaalaanba waxaa laga dalban karaa waaxda canshuuraha (Skatteverket), ama telefoonkaan 0771 567 567, ama waxaa laga soo degsan karaa bogga internetka ah ee waaxda canshuuraha oo ah kan [Skatteverkets webbplats](#).

Wargelinta dhaxalka

Wargelinta dhaxalka waa qoraal dukumiinti ah oo marmarka qaar bedeli kara diiwaangelinta hantida iyo deynta marxuumka/marxuumada. Waxaad codsi u dirsan kartaa si aad u sameyso wargelinta dhaxalka haddii qofka dhintay hantidiisu aysan dhaafsaneyn (ka badneyn) kharashka duugta/aaska iyo wixii kale ee kharasha oo la xariira.

Qofka geeriyooday hadii uu ku leeyahay hanti ma gurto ah ama dhul aan dhisneyn waddanka Iswiidhan ama dibbediisa markaas

waa in la sameeyo diiwaangelinta hantida iyo deynta laga dhintay (bouppteckning).

Si ay maamulka degmadu (kommunen) ay baaritaan ugu sameeyaan haddii ay suurta gal tahay in la sameyn karo iyo in aan la sameyn karin wargelinta dhaxalka (dödsboanmälan) waa in aad la xirriro waaxda baaritaanka hantida iyo deynta laga dhintay (boutredningsenheten) saddex bilood gudahood laga bilaabo maalintii geeridu dhacday.

Xirriirka ugu horeeya ku samee
telefoon. Wac nambarkaan 031-367
90 79

Warbixin dheeraad ah iyo macluumaadka xirriirka labadaba waxaad ka heleysaa waaxda baaritaanka hantida iyo deynta laga dhintay (Boutredningsenheten) ee Göteborg iyo boggaan internetka ah ee soo socda
www.goteborg.se/boutredningsenheten

Diiwaanka qoraalka ah ee hantida iyo deynta qofka dhintay ma la taaban karo ilaa dadka dhaxalka wax ku leh oo dhan ay ka wada arkayaan hantida meesha taal intey la egtahay.

Adiga waxa lagaa rabo in aad sameyso waa:

- 1. In aad ku wargelisaa dadka dhaxalka wax ku leh oo dhan geerida dhacday.**
- 2. In aad sugtaa oo aadan bixin biilasha, sababtoo ah kharashka duugta/aaska ayaa ka horeeya biilasha bixintooda oo dhan.**
- 3. Waa in aad joojisaa biilasha otamaatika u go'a ee lagu magacaabo (autogiro).**
- 4. Isku day in aad soo ogaato haddii uu qofka dhintay lahaa caymiska nolosha ama caymiska- kharashka duugta/aaska.**
- 5. In aad tagtid waaxda canshuuraha (Skatteverket) oo adareeska/ciwaanka ku bedeshid qofka maamulaaya hantida iyo deynta laga dhintay gurigiisa.**

6. In aad celisid heshiiska/kuntaraadka guriga, korontada, telefoonka iyo joornaalka iyo wixii kale oo la mid ah.

Dalbo kaalme dhaqaale oo lagu duugo/aasso

Si aad kaalme dhaqaale ugu dalbato duugta/aaska waxaad la xiriiireysaa xafiiska arrimaha bulshada (socialkontoret) ee ku yaal xaafada uu qofka geeriyooday deggannaa.

Qolada adeega bulshada ayaa kaaga sheekeyn doonta inta uu yahay kharashka loo qoondeyay iyo wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka uu marayo duugta/aasku (utredningsprocessen).

Qasab kuguma aha in aad marka hore sameyso wargelinta dhaxalka (dödsboanmälan) si aad kaalme dhaqaale ugu dalbato duugta/aaska. Waa isku mid oo adigoo sameeyay diiwangelinta hantida iyo deynta ayaad dalban kartaa (bouppteckning) kaalme dhaqaale.